

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA  
XAFIISKA NOOTAAYAHA & LATALINTA  
ARRIMAHA SHARCIGA EE TAYO  
MUQDISHO - SOOMAALIYA



جمهورية الصومال الفدرالية  
مكتب تيو لتوثيق العقود  
والإستشارات الشرعية  
مقديشوا - الصومال

SHARCIGA DHISMAHA NOOTAYO

(CAALAMI PUBLIC NOTARY)



MOGADISHU-SOOMAALIYA

2025



+252 612-223788  
+252 615-353330

info@tayonotary.com  
www.tayonotary.com

Bakara Market, Near Maalin Tajir  
Building, Mogadishu - Somalia



**MASAWIRKA MILKIILAHA**

C/QAADIR IBRAAHIM CALI



**UJEEDO:- DHISID SHARCIGA CAALAMI PUBLIC NOTARY**

**Maanta** oo ay taariikhdu tahay **08/02/2025**, Anigoo ah **Dr, Maxamed C/Ilaahi Maxamed “Maxamed Nootaayo”**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed Ee Daarta Maalin Taajir Ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid Mudanahaan hoos ku Xusan:-

1- Dr.Abdulqadir Ibrahim Ali Somali ah, Degan Muqdisho, Lehna Somali Passport No.P01104514 Ahna Milkiilaha Caalami Public Notary.

Mudanaha kor ku xusan asaga oo caafimaad qaba, caqligiisuna taam yahay, cid heshiisnaan ku qasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, waxuu i weeydiistay in aan u qoro heshiis ku saabsan dhismo sharci Nootaayo oo ka kooban qodobada hoos ku qoran:-

**QODOBKA 1-AAD**

**MAGACA IYO ASTAANTA NOOTAAYADA  
CAALAMI PUBLIC NOTARY**



**QODOBKA 2-AAD  
XARUNTA NOOTAAYADA**

Xarunta Caalami Public Notary, Waa Degmada H/Wadaag Ee Magaalada Muqdisho Caasimadda Soomaaliya.

**QODOBKA 3-AAD  
WAQTIGA LA ASAASAY**

Caalami Public Notary Waxaa La Asaasay Sanadkii 21/06/2021 Waxaa Lagu Asaasay Magaalada Muqdisho Ee Caasimada Soomaaliya Lehna Xeer Madaxwayne NO.438/21 Tr-19-08-21 uuna Saxiixay Madaxwayne Maxamed C/Ilaahi Maxamed “Farmaajo”

**QODOBKA 4-AAD  
NOOCA NOOTAAYADA.**

Nootaayadani waa Nootaayo uu lee yahay qof shaqsi ah (Sole Proprietorship) haddaba dhamaan hatida Nootaayada waxaa ka ma'sul ah Milkiilaha Nootaayada.



+252 612-223788  
+252 615-353330

info@tayonotary.com  
www.tayonotary.com

Bakara Market, Near Maalin Tajir  
Building, Mogadishu - Somalia



**QODOBKA 5-AAD**  
**UJEEBADA NOOTAAYADA WAA**

- Qorista Heshiisyada & Arjiyada. & Codsiyada
- Qorista Wakaaladaha Guud & Kuwa Gaarka ah
- Qorista Cadeymaha
- Latalinta Arimaha Sharciga & Dhaxalka.

Hantida Guurtada iyo Maguurtada Sida

- Kala Wareejinta dhulka
- Kala Wareejinta Guryaha
- Kala Wareejinta Gaadiidka

**QODOBKA 6-AAD**  
**MILKIILAHA NOOTAAYADA**

Milkiilaha Nootaayada Waa Dr. Abdulqadir Ibrahim Ali Waxuuna Awood Buuxda U Leeyahay Maamulka Guud Ee Nootaayada iyo kutasarufka hantida, Sida In Uu Lacag Ku Shubi Karo Kana Saari Karo Bangiyada Dalka Iyo Dibadaba, Saxiixi Karo Jeegaga iyo Rahana Gelin Karo Hantida Nootaayada, Kana Saari Karo Una Soo Gadi Karo Una Soo Ibin Karo Nootaayada Hantida Maguurtada Iyo Guurtada Sida Dhulalka, Guryaha , Baaburta Iwm , Lana Geli Karo Heshiisyo Iyo Macaamilaad Shirkado Kale Iyo Hayadaha Dowliga Ah Iyo Kuwa Aan Dowliga Aheynba Oo Ay Dani Ugu Jirto Nootaayada .

**QODOBKA 7-AAD**  
**TIRADA DADKA AA'SAASAHA NOOTAYADA**  
Nootaayada waxaa aa'saasay halka qof ee sare ku xusan.

**QODOBKA 8-AAD**  
**HADUU MILKILUHU GEERIYOODO**

Hadii Uu Milkiilaha Geeriyoodo Waxaa Xaqiisa Yeelanaya Dhaxaltooyadiisa Sharciga Ah, Oo Ay Soo Caddeyso Maxkamad, Kadib Waxay Soo Magacaabanayaan Wakiilo.

**QODOBKA 9-AAD**  
**XISAABTA NOOTAAYADA**

Xisaab xirka Nootaayada :- xisaabta Nootaayada waxaa la xirayaa Bilkasta Dhamaadkeeda



+252 612-223788  
+252 615-353330

✉ info@tayonotary.com  
www.tayonotary.com

Bakara Market, Near Maalin Tajir  
Building, Mogadishu - Somalia

**QODOBKA 10-AAD**  
**GUDOOMINTA SHIRARKA NOOTAAYADA**

Shirarka kala duwan ee Nootaayada, waxaa shir gudoominaya Milkiilaha Nootaayda, haddii uu maqan yahay Milkiilaha, waxaa shirarka gudoominaya Kaaliyihisa ama madaxa xisaabedka Nootaayada iyo cidii kale oo si qoraal ah ugu wakiisho Milkiilaha marka lawaayo ku xigeenkiisa iyo madaxa xisaabedka Nootaayada.

**QODOBKA 11-AAD**  
**WAXYAABAHA AAN LAGU XUSIN XEERKAN**

- Dhammaan waxaa aan lagu sheegin xeerkan waxaa loola noqonaya sharciga islaamka qeybta mucaamalaadka iyo Nootaayadaha, sidoo kale qawaaniinta dalka u degsan.
- F.g wixii shareecada Islaamka ka hor imaanaya waa waxba kama jiraan.


**QODOBKA 12-AAD**  
**ISTICMAALIDDA MAGACA NOOTAAYADA**

- Magaca Nootaayada ayaa loo isticmaalayaa dhammaan hantida Nootaayada sida: Rasiidyada, infoosyada guryaha, dhulalka, gaadiidka, bank account, & tiimbarayaasha iwm.

**QODOBKA 13**  
**HESHIISKAN WUXUU KA KOOBAN YAHAY**  
**13 QODOB 1 COVER , 4 BOG IYO 2 NUQUL OO ORJINAAL IYO KOOBI AH.**

SAXIIXA MILKIILAHA

Dr. C/QAADIR IBRAAHIM CALI



**( XAFIISKA NOOTAAYAHA )**

**REP. 1386/T.P.N/25, Tr.08/02/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo",** Waxaan Sugayaa in Saxiixa Kor Ku Xusan uu yahay Saxiixii Runta ahaa waxaan halkan ku caddeynayaa in heshiiskan dhismaha sharciga Nootaayada ee kor ku xusan uu yahay mid sax ah oo waafaqsan shareecada islaamka iyo shuruucda madaniga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, islamarkaana uu saxiixay milkiilaha Nootaayada Nootaayaduna waxey hubisay magaca inuu yahay kii dhabta ahaa ee lahaa saxiixaan kor ku xusan, waxaana lagu qoray Diiwaanka guud ee Nootaayada.

**NOOTAAYAHA**

**Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"**



+252 612-223788  
+252 615-353330

info@tayonotary.com  
www.tayonotary.com

Bakara Market, Near Maalin Tajir  
Building, Mogadishu - Somalia








**FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA**

**Tr. 08/02/2025**

Aniga oo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **C/qaadir Ibraahin Cali** oo ka Wakiil ah Loo Caddeeye **Sharciga Nootaayo Caalami** Dukumiintiga **Original** Caddeynta **Rep No. 1386/T.P.N/25, Tr. 08/02/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

<b>Magaca Loo Caddeeyaha</b>	Sharciga Nootaayo Caalami
<b>Taariikhda Caddeynta</b>	08/02/2025

**Wakiilka Loo Caddeeye:** Aniga oo ah **C/qaadir Ibraahin Cali**, Leh Tel No. **0615144023**, Degan **MUQDISHO** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaaday Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Caddeynta faah faahinteedu Sare ku cadahay uuna leeyahay **Sharciga Nootaayo Caalami**.



**SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA**

**Dr. Maxamed C/laahi Maxamed**

**SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA**

**C/qaadir Ibraahin Cali**